

4.10.010-P Diiwaangelinta Qasabka ah Iyo

4.10.010-P Diiwaangelinta Qasabka ah Iyo Imaanshaha

- (C) Barnaamijyada ku aadan daboolida sharuudaha Barashada Koowaad iyo Shahaadada Barashada Hormarsan iyo heerarka caadiga ah ee gobolka iyo degmada deegaanka oo waxqabadyada;
 - (D) Xaalada naafonimada hadda, haddii ay quseyso;
 - (E) Xaalada naafonimada hore, haddii ay quseyso;
 - (F) Natiijooyinka degmada iyo qiimeynada gobolka, oo ay ku jiraan hormarka lagu daboolayo heerarka gobolkoo dhan;
 - (G) Qiimeynta macalinka;
 - (H) Qiimeynta la taliyaha;
 - (I) Qorshooyinka degdega ah;
 - (J) Warbixinta kaloo quseyso.
- (5) Haddii maamulaha uu ku taliyo in ka dhaafida ka qeybgalka qasabka ah la bixiyaa, diiwaanka iyo talladiisa/talladeeda waa in loo gudbiyaa maamulaha masuulka ka ah waxbarashada kale. Maamulaha waa inuu dib u eegaa tallada oo uu u gudbiyaa taladiisa/taladeeda oo kormeerayaasha guud ama ansixinta wakiilka. Haddii ka dhaafida la bixiyaa, maamulaha waa inuu ku siiyaa kuwa xiggo canuga iyo waalidka ama masuulka sharciga ah qoraal ahaan:
- (a) Sharaxaada barnaamij walboo kale ee waxbarashada ama waxbarashada lagu daray la talinta ku haboon oo ay heli karaan ardayda sida lagu sheegay ORS 339.250(10) iyo (11);
 - (b) Ogeysiinta in: (1) ka dhaafida waxaa la bixiyaa waqti xadidan; (2) Ka dhaafida waa in dib loo cusbooneysiisiiyaa si sannadle ah; iyo (3) ka dhaafida waxaa dib ugu eegayo degmada taariiqda qaar;
 - (c) Ogeysiin in waalidka/ardayga ay tahay inuu dib u codsado ka dhaafida taariiq gaar ah ama ardayga waa inuu ku soo laabtaa dugsiga illaamaa isaga/iyada ay ka helaan dibloomada dugsiga sare, GED ama da'da 18 sanno jirka.

Tixraacyada Sharciga: ORS 339.010; ORS 339.020; ORS 339.030; ORS 339.250; OAR 581-021-0076

Taariikhda: Waxaa la qaatay 6/71; La badelay 9/73; La badelay 5/24/90; La badelay 12/21/91; La badelay 11.20/92; La badelay 9/9/02; BA 2420